

**DIWAANKA TALLAALKA ARDEYDA
SHURUUDAHA LAGA RABO DA'DA/FASALKA
(STUDENT IMMUNIZATION LAW AGE/GRADE REQUIREMENTS)**

Inta soo socoto ayaa ah tirade ugu yar ee tallaalka da' walbo iyo fasal walbo sida waafaqsan Wisconsin Student Immunization Law (Sharciga tallaalka Ardayda). Shuruudahan ayaa looga tagi karaa sababo la xiriira caafimaadka, diinta ama sababo shaqsiyadeed. Tallaalo dheeriya ayaa lagula tallin karaa ilmahaaga ayadoo ay ku xiran tahay da'da ilmaha. Fadlan la xiriir dhaqtarkaaga ama waaxda caafimaadka ee deegaankaaga haddii ilmahaaga u baahan yahay tallaalo dheeriya.

**Teebalka 144.03-A
Tallaalada loo baahan yahay ee 2023-2024 Sannad dugsiyeedka**

Da'da/Fasalka	Tallaalka loo baahan yahay (Tirada Darsin)							
5 bilood ilaa 15 bilood	2 DTP/DTPaP/DT		2 Polio			2 Hep B	2 Hib	2 PCV
16 bilood ilaa 23 bilood	3 DTP/DTPaP/DT		2 Polio	1 MMR		2 Hep B	3 Hib	3 PCV
2 sanno ilaa 4 sanno	4 DTP/DTPaP/DT		3 Polio	1 MMR	1 Var	3 Hep B	3 Hib	3 PCV
Kindergarten ilaa Fasalka 6aad	4 DTP/DTPaP/DT		4 Polio	2 MMR	2 Var	3 Hep B		
Fasalka 7 ilaa fasalka 12	4 DTP/DTPaP/DT	1 Tdap	4 Polio	2 MMR	2 Var	3 Hep B		

- Children > 5 jir ee fasalka Xanaanada Caruurta waa in lagu qiimeeyo iyada oo la isticmaalayo shuruudaha tallaalka ee Xanaanada ilaa fasalka 6aad, oo caadi ahaan waxay la mid yihiin da'da ilmaha.
- D= Jeermis sun ah, T = teetano, P = xiiqdheer. DTPaP/DTP/DT/Td tallaalka oo laga rabo arday kasta Xanaanada Caruurta ilaa Fasalka 12aad; Afar qeybood ayaa khasab ah. Hase ahaatee, haddii arday soo qaatay qeybta 3^{aad} ka dib dhalashada 4^{aad}, qeybo dheeraad ah loogama baahna. **Ogow:** Qeyb ah wax ka yar 4^{aad} maalmood ka hor dhalashada 4aad waa la aqbali karaa.
- Tallaallada carruurta ee DTPaP/DTP/DT markay bilaabayaan Xanaanada: Mid kastaa waa in uuu soo qaatay hal qeyb dhalashada 4^{aad} si ay sharciga u raacaan (ama qeybta 3^{aad}, 4^{aad}, ama 5^{aad}). **Ogow:** qeyb ah wax ka yar 4^{aad} maalmood ka hor dhalashada 4aad waa la aqbali karaa.
- Tdap waa teetanada dhallinta, gowracatada iyo tallaalka xiiqdheerta. Haddii arday soo qaatay hal qeyb oo tallaalka teetanadu ku jirto, sida Td, 5 sano gudahood ka hor inta uusan bilaabin fasalka Tdap looga baahan yahay, ardeygu wuxuu raacay sharciga oo qeyb kale oo ah tallaalka Tdap loogama baahna.
- Tallaalka dabeysha ee ardeyda bilaabeyna kindergarten ama barbaratooniga ilaa Fasalka 12aad; Afar qeybood ayaa laga rabaa. Hase ahaatee, haddii arday soo qaatay qeybta 3^{aad} ka dib dhalashada 4^{aad}, qeybo dheeraad ah loogama baahna. **Ogow:** qeyb ah wax ka yar 4^{aad} maalmood ka hor dhalashada 4aad waa la aqbali karaa.
- Caddeyn sheybaar oo ah difaac in laga haysto cagaarshowga B waa la aqbali karaa.
- MMR waa tallaalka jadeecada, qaamowqashiirka, iyo jadeeco-beenaadka. Darsinka ugu horeyo tallaalka MMR waa in aad qaadatay dhalashada 1^{aad}. Caddeyn sheybaar oo ah difaac in laga haysto dhammaan saddexda cudur (jadeecada, qaamowqashiirka iyo jadeeca-beenaadka) waa la aqbali karaa. **Ogow:** qeyb ah wax ka yar 4 maalmood ka hor dhalashada 1^{aad} waa la aqbali karaa.
- Tallaalka Varicella waa tallaalka busbuska. Ardayda leh taariikh la og yahay ee cudurka varicella looma baahno in ay qaataan tallaalka Varicella. Waalidka ama masuulka ardayga ayaa sheegi kara in ardaygu horay uqaatay foomka tallaalka busbuska Student Immunization Record (Diwaanka Tallaalka Ardayda) (F-04020L).

